

Golaha Wakiilada JSI

Minuteska.

Doodii Xeerka sharciyada Abaabul ka Saarka Qaranka.

Kal-fadhigii 13^{aad} Fadhigiisii 21^{aad} Sabti /Taariikhda 07/11/2010

Doodu waxay socotay halı maalin waxaana ka qayb galay 5 xilldhibaan.

1. Xill. Mohamed Jama Haji Elmi (Dable)

Wuxuu soo jeediyay xilldhibaanku.

- In Hay'adan la hooskeeno Wasaarada arrimaha guddaha waayo Hubka dhigistu waxay hoostagtaa wasaaradaas.
- Sidoo kale waa in Wasaarado badan oo Xeerka ka Hay'ada qayb ka ah oo iminka ka maqan lagu Daraa Sida Wasaarada Diinta iyo Awqafta, Wasaarada Arrimaha Bulshada iyo Wasaarada Warfaafinta oo qayb muhiima ayay ka qaadanayaay Hay'adan.
- Waxaa kaloo aan odhan lahaa xeerkii Hubka fudud waa lagu dagdagay oo waxaa ku jiray waxyaabo badan oo lagu degdegay markaa kana yaan lagu dagdagine aad ha loo eego..

2. Xill. C/raxmaan Sh. Muuse

Wuxuu soo jeediyay

- In maadaama Hay'adani tahay mid nabad galyo kana shaqayso nabadgallyo waa in la hoos geeyaa Wasaarada arrimaha guddaha sida uu xilldhibaankii hore sheegay.

3. Xill. Maxamed Faarax Qabile

Wuxuu soo jeediyay

- Waxaan qabaa in xeerku koobanyahay, markaa waa in xeerka la naaxnaaxiyaa oo waxbadan lagu daraa.
 - Waxaa kaloo jira in erayada xeerku iska hor imanayaan eray bixintana waa in la saxaa.
- . Qodobka 4aad waxaa ku taal kalmada (volunteer) mutadawacnimo, sharciyana mutadawacnimo kuma jirto oo hadii voluntary laga dhigo waxaa imanaysa in hawshii balaadhato, markaa waa in kalmadaa laga saaraa oo waajib laga dhigaa.

- 4. C/qaadir X. Ismaciil Jirde:-** Ugu horayn xilldhibaanku wuxuu ka sheekeeyay taariikhdi. Xeerka isagoo sheegay in abuubulka-saarku bilaabmay Axdigii nabada ee beeluhu heshiiyeen, hadaba barnaamijkan waxa fulinaysa dawlada laakiin waxaa u xilsaaran hay'adan. Markaa waxaan odhan lahaa policyga hay'adan dawlada ha loo daayo, Maalmulkeedana madaxwayne ku -xigeenka ha loodaayo oo ha la hoosgeeyo. Innaga Gole ahaan waa inaynu ansixinteeda yeelanaa, xeerka waxaa ku qoran gudiddu waxay kulmayaan 2 biloodba mar, laakiin waa inay sida kuwa miinada 3 biloodba mar ka dhignaa.

Anologyga kale oo jiraa sheegaya in hay'adii miinada waxaa ku jira Wasaarado badan, Hay'adana waa in Wasaarado badan ku jiraan.sidaa darteed waxaan soo jeedinaya

- In Madaxwayne ku-xigeenka loo daayo maamulkla hay'adan sidii tii miinada loogu daayay.
- In wasaarado badan lagu daro, waayo hadii wasaarad kaliya lagu daayo waxaa iman doonta in isku qabqabsado.
- In laba hay'adood ee miinada iyo abaabulkasaarka oo uu gudoomiye u noqdo Madaxwayne ku-xigeenka oo la iswaafajiy.
- In lagu daro xeerka in Goluhu ansixiyo Gudoomiyaha Hay'adan .

5. Xill. Ibraahim Axmed Raygal.

Wuxuu soo jeediyay

- Hay'adan waa in la hoosgeeyaa Wasaarada Arrimaha Gudaha, waayo waa wasaarada kaliyee dalka wada gaadhey ee meelkasta laga helayo. Sidoo kale xeerka waxaa kujira khaladaad xaga qorida ah taana waa in la saxaa oo gudidii keentay soo saxdaa.

Cawad Cali Maxamed

Agaasimaha waaxda Hadal Qoraalka Golaha Wakiilada Xoghayaha Guud ee Golaha wakiilada JSI

C/risaaq Siciid Ayaanle